

King County

XAFIISKA HANTIDHAWRAHA
DEGMADA KING

ABRIL 24, 2024

# Xidhista Carruurta: Dhalinyaro Badan Waxay Waajahayaan Joogista dheer ee Xarunta loogu talagalay Taageerada Muddada gaaban

JUSTIN ANDERSON
GRANT DAILEY
MIA NEIDHARDT
BROOKE LEARY

## SOO KOOBISTA FULINTA

Degmada King ma lahan dhismayaal si joogto ah u daboola baahiyaha kala duwan ee dhalinyarada ee ku jira xabsiga sugan ee Patricia H. Clark Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Qoyska iyo Carruurta, CCFJC). Iyadoo ay ugu wacan tahay sbeddellada siyaasadda ee heer gobol iyo heer deegaan, Degmada King waxay maanta haysataa inyar oo dhalinyaro ah kuwaasoo haysta xabsi ammaan ah, celcelis ahaan, marka loo eego shan sanno ka hor sida xaalku ahaa. Taasina waxay keentay in da'ayartii halkaa joogtay ay la kulmaan eedaymo ka sii daran oo ay sii joogaan muddo dheer. Si kastaba ha ahaatee, CCFJC haynta sugan waxaa loogu talagalay joogitaan gaaban iyo taageerada lagu bixiyo halkaas ma buuxinayso waxbarashada, kobcinta, iyo baahiyaha caafimaadka maskaxda ee dhalinyarada muddada dheer xabsiga lagu hayo. Intaa waxaa dheer, shaqaale yaraantu waxay keeneysaa caqabado shaqo oo keena in dhallinyaradu ay waqti badan ku qaataan qolalkooda. Dhalinyaradu waxay ka warbixiyeen inay la kulmeen caajis, hubanti la'aan, iyo walbahaar inta lagu jiro wakhtiga ay ku jiraan xabsiga ammaanka ah. In kasta oo ay jiraan dadaallo socda oo lagu joojinayo xabsiga ammaanka ah ee lagu hayo dhallinyarada degmada King, dhallinyaradu waxay ku sii jiri doonaan CCFJC ugu yaraan afarta sanno ee soo socda — qaarna muddo dheer. Waxaan soo jeedinaynaa tallooyin si wax looga qabto daldaloolada daryeelka dhalinyarada ku jira xabsiga badqaba ee Degmada King.

# Mahadcelin

**Shaqaalaha iyo hogaamiyayaasha Qaybta Dhallinta ee Department of Juvenile and Adult Detention (Waaxda Xabsiyada Dhalinyarada iyo Dadka Waaweyn, DAJD) - gaar ahaan saraakiisha xabsiga, kormeerayaasha, shaqaalaha caafimaadka iyo caafimaadka dhimirka, barnaamijyada, iyo shaqaalaha jikada - waxay muujiyeen sida ay u daryeelaan dhalinyarada xabsiga lagu hayo. ee Patricia Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Qoyska iyo Carruurta, CCFJC) iyo sida ay uga go'an tahay shaqadooda.** Shaqaaluhu waxay qabtaan waa adag tahay shaqaaluhuna waxay sii wataan shaqadooda iyada oo ay ku jiraan caqabadaha shaqaalaynta, saacadaha dheeraadka ah ee qasabka ah, iyo mustaqbalka shaqo ee aan la hubin marka la eego jihada siyaasadeed ee lagu xidhayo dhismaha. Dhallinyarada aan waraysanay waxay si joogto ah ula wadaageen in shaqaaluhu ula dhaqmeen si naxariis leh oo ay si dhab ah u daryeelaan badqabkooga.

**Inta lagu jiro xilliga hanti-dhawrka, hoggaanka Qeybta Dhallinyarada waxay muujiyeen sida ay uga go'an tahay horumar joogto ah.** Tusaale ahaan, kooxda maaraynta Qeybta dhallinta waxay dib u eegaan tusayaasha xogta maalinlaha ah, ama "iskuxidhka guddida", si ay ugu wargeliyaan go'aannada hawlgalka, dib u eegaan siyaasadaha qeybinta iyo habraacyada si loo hubiyo in ay casriyeen, oo ay qandaraas la galeen qolo saddexaad si ay u sameeyaan dib u eegis badbaadada iyo badqaba shaqaalaha iyo dhalinyarada xabsiga ku jira.

**Waxaan u mahadcelinaynaa madaxda iyo shaqaalaha DAJD iyo Qeybta dhallinyarta ee wada shaqaynta ka dhaxaysay muddadii uu socday hanti-dhawrka.** Hogaanka DAJD iyo Qeybta dhallintu waxay isu diyaariyeen inay ka jawaabaan su'aalaha iyo inay ka jawaabaan codsiyada dhukumentiga iyo xogta muddaysan iyo wada shaqayn leh. Kooxda hoggaanka ayaa shaqaalaha ka caawiyay inay helaan goobta lagu hayo ee tamashlaha, waraysiyada shaqaalaha, iyo inay la hadlaan dhalinyarada xabsiga ku jirta. Shaqaalaha ka shaqaynayay qeybta xabsiga sugan ee CCFJC ayaa wakhti ku qaatay inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay wadaagaan aragtidooda.

**Maamulka Fulinta ee Degmada King waxa uu ka shaqaynayay sidii uu u samayn lahaa xal siyaasadeed oo dhamaystiran oo loogu talagalay dhalinyarada ku jirta xabsiga sugan ku dhawaad 10 sanno.** Tamar la taaban karo ayaa lagu dabaqay habka qorshaynta daryeelka iyo xidhitaanka iyo bixinta jawaabaha. Marka degmada King ay u dhaqaaqdo ballaadhinta beddelka bulshada ee lagu sugayo xabsiga dhalinyarada si loo xidho xarunta dhalinyarada lagu hayo, Maamulka Degmadu wuxuu qeexayaa qorshihiisa inuu yahay dadaal lagu doonayo in xuddun looga dhigo dhalinyarada, daryeelka, iyo isku xidhka, iyo si loo yareeyo waxyeelada nidaamka cadaalada ee dhalinyarada oo aan hadda ku shaqayno. Maamulka gobolka ayaa xusay in loo baahan yahay tallaabo geesinimo leh si wax looga beddelo nidaamka sharciga dhalinyarada laguna taageero dhalinyarada.

# QODOBADA MUHIIMKA AH EE WARBIXINTA

## Waxaan Helnay

Celceliska xadiga wakhtiga dhalinyaradu ku qaataan xabsiga sugan ee Patricia H. Clark Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Qoyska iyo Carruurta, CCFJC) inta ay sugayaan kiisaskooda in la xaliyo ayaa koray wakhti ka dib. Isku soo wada duuboo, celceliska muddada joogitaanka dhalinyarada ee xabsiga ammaanka ah wuu saddex jibaarmay intii u dhaxaysay 2017 iyo badhtamihii 2023, oo wuxuu kordhay 12 maalmood ilaa 36 maalmood. In ka badan 200 oo dhallinyaro ah ayaa in ka badan 100 maalmood ku jiray xabsi ammaan ah. In kasta oo muddada joogitaanku ay dheer yihiin oo dhalinyarada ay wajahayaan eedeymaha dadka waaweyn, waxaan ogaanay in mudada joogitaanku ay sidoo kale sii kordhayaan dhalinyarada wajahaysa eedeymaha dhalinyarada.

Xabsiga sugan ee CCFJC waxaa loogu talagalay joogitaan gaaban iyo taageerada lagu bixiyo halkaas ma buuxinayso waxbarashada, kobcinta, iyo baahiyaha caafimaadka maskaxda ee dhalinyarada muddada dheer xabsiga lagu hayo. Degmada King ma siiso barnaamijyada caafimaadka dhimirka ee muddada dheer kuwa ku jira xabsiga ammaanka ah, mana bixiso daaweynta ku xadgudubka mukhaadaraadka ama tababar shaqo. Intaa waxaa dheer, heerarka shaqaalaynta oo yaraada waxay keentay in la gaabiyo xilli dugsiyeedka, la joojiyay fadhiyada kor u qaadista hawlaha, iyo wakhtiga qolka oo badan taasoo dhalinyaradu waajahayaan, iyadoo kordhisa heerarkooda walaaca. Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhallinyarta, DAJD) waxay isku dayday dhowr wax ka qabasho shaqaaleysiin labadii sanno ee la soo dhaafay iyada oo ku guulaysatay waxoogaa guul ah, laakiin dhaqanka xun iyo hubinti la'aanta habka hagaajinta waxqabadka wanaagsan ayaa ka dhigaya horumar joogto ah.

Dhalinyaradu waxay la wadaageen tabashooyinka ku saabsan xaaladaha nololeed ee ka dhex jira CCFJC xabsiga ammaanka ah, carqaladna ku ah hawl maalmeedka, iyo booqashada xaddidan. Marka loo eego dhalinyarada, caqabadahani waxay keeni karaan walaac waxayna kordhin karaan halista rabshadaha iyo dhacdooyinka caafimaadka dhimirka ee xarunta ka dhexjira.

## Waxaan Ku Tallinayno

Waxaan u soo jeedineynaa tallooyinka loogu talagalay Degmada King si ay wax uga qabato baahiyaha horumarinta xirfadaha iyo daaweynta ee dhalinyarada lagu hayo xabsiga sugan muddada dheer ee joogayaan halkaas. Waxaan sidoo kale u soo jeedinaynaa tallooyin maamulka DAJD si ay u sameeyaan isbeddel hawleed sida wax ka beddelka nidaamka kala-soocidda guriyeynta, bixinta dib u eegista waxqabadka iyo fursadaha tababarka ee u dhexeeya shaqaalaha iyo kormeerayaasha, iyo hagaajinta helitaanka dhalinyarada ee hannaanka cabashooyinka madaxa bannaan ee laga heli karo Xafiiska Ombuds.

## Sababta Baadhistani Ay Muhiimka u Tahay

In kasta oo Maamulka Fulinta ee Degmada King uu ka shaqaynayey sidii loo soo afjari lahaa xadhiga dhalinyarada, Guddiga Latallinta Daryeelka iyo Xidhitaanka ee Degmada ayaa hadafkan dib ugu riixay 2028, ugu horrayn, dhalinyarada oo wajahaya eedaymo carruurnimo la xidhiidha, oo ay u badan tahay in intaas dhaafsiisan tahay oo loogu talagalay dhalinyarada wajahaysa eedaymo dad waaweyn. Sidaa darteed, dhallinyaradu waxay ku sii jiri doonaan xabsiga ammaanka ah ee CCFJC ilaa hadda. Dhallinyaradani waxay leeyihiin joogitaan dheer oo sii kordhaysa iyo baahiyo daaweyn oo iskudhafan oo xaaladda hadda jirta aanay waxba ka qabanayn - gaar ahaan dhallinyarada oo wajahaya eedaymo dad waaweyn. Iyadoo aanay jirin adeegyada ku habboon ee dabooli kara baahidooda wakhtiga ku habboon, dhallinyarada ku jirta xabsiga ammaanka ah waxay la kulmi karaan saameyn xun oo mustaqbalka fog ah oo ku wajahan badqabkooga.

**Celceliska muddada joogitaanka xabsiga sugan ayaa kordhay sannadaha 2017-2023.**




Isha Xigashada: Falanqaynta xogta Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhallinyarta) Xafiiska Hantidhawrka Degmada King, Jeeniwari 2017 - Juun 2023

# liiska Tallooyinka

## Tallada 1

Maamulka Degmada King iyo Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhallinyarta) waa in ay sameeyaan falanqeyn ku saabsan baahiyaha dhalinyarada sida ammaanka ah ugu xidhan ee Patricia H. Clark Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Qoyska iyo Carruurta, CCFJC). Falanqaynta waa in ay tixgelisaa oo ay diwaangalisaa:

- muddada dhabta ah ee joogitaanka ay waajaheen dhalinyarta kujirta xaruntu
- baahiyaha daawayn iyo xirfadeed ee da'da ku haboon ee dhalinyarada xidhan muddo dheer
- sida adeegyada loo kala sooci karo muddada dheer ee joogitaanka.

## Tallada 2

Iyada oo ku saleysan natiijooyinka falanqaynta ee Tallada 1, Maamulka Fulinta ee Degmada King iyo Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) waa in ay qoraan oo ay hirgeliyaan qorshe wax looga qabanayo farqiga u dhexeeya barnaamijyada iyo adeegyada si badbaado leh u xidhay dhalinyarada baahida qabta iyo kuwa la bixinayo.

Iyadoo lala kaashanayo Maxkamadda Sare, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha iyo Department of Public Defense (Waaxda Difaaca Dadweynaha), qorshaha waxaa ka mid noqon kara:

- fursadaha barnaamijyada ama adeegyada gaarka ah ee dhalinyarada si ammaan ah u xidhan
- aqoonsiga horumarinta jireed ee Patricia H. Clark Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Qoyska iyo Carruurta, CCFJC).
- aqoonsiga beddelka meelaynta ee CCFJC xabsiga sugan, oo ay ku jirto meelaynta Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Xarumaha Qoysaska) ay maamusho ee Gobolka Washington iyo meelo kale
- dhokumentiyada ku saabsan la jaanqaadida tallaabooyinka lagu daray Jeeniwari 2024 Daryeelka iyo Xidhitaanka Warbixinta Qorshaynta Istaraatiijiyadeed ee Mustaqbalka Xabsiga Sugan ee ay Kujiraan Caruurta.

## Tallada 3

Iyada oo qeyb ka ah warbixinta xogta dadweynaha ee dadka lagu hayo xabsiga, Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) waa in ay la socotaa, diwaangelisaa, oo ay ka warbixisaa tirada dhalinyarada xabsiga ammaanka ah ku jirta muddada dheer oo ay ku wargeliso macluumaadkaas Department of Public Defense (Waaxda Difaaca Dadweynaha), Xafiiska Xeer-ilaalinta, iyo Maxkamadda Sare ee u isticmaalkooda wax ka qabashada wakhtiga xallinta iyo muddada dheer ee joogitaanka.

## Tallada 4

Qeybta dhallinyarta ee Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) waa in ay sahamisaa fursadaha lagu dejiyo dhalinyarada wajahaysa eedeymaha dadka waaweyn ee ka gooni ah dhalinyarta ka yar da'da 16 ee lagu soo oogay keliya dembiyada dhallinyarta oo ay diiwaangeliyaan sida tan loogu daro nidaamka kala soocidda guriyeynta.

## Tallada 5

Iyada oo qayb ka ah warbixinta xogta dadka la hayo ee dadwaynaha la hayo, Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) oo Xabsiyadu waa in ay la socdaan, qoraan oo ay ka warbixiyaan tirada dhalinyarada ee aanu shakhsi ahaan u booqan qareenkoodu 30 maalmood ama ka badan.

## Tallada 6

Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) iyo Xabsiyada Dhallinyaradu waa inay horumariyaan, diiwaangeliyaan, oo gudbiyaan qorshe qeexaya heerka shaqaaleysiinta ee ku habboon si loo daboolo baahiyaha dhallinyarada xabsiga ku jira. Qorshaha shaqaalaynta waa in lagu wargeliyaa qiimeynta baahiyaha ee la sameeyay iyadoo laga jawaabayo Tallada 1 iyo, markeeda, waa in la ogeysiiyaa dadaallada qorista ee socda iyo mustaqbalka.

Ugu yaraan, qorshuhu waa inuu ku xisaabtamaa tirada iyo noocyada shaqaalaha loo baahan yahay si loo hubiyo in:

- dhalinyaradu wakhti kuma qaataan unugyadooda sababtoo ah xaddidnaanta shaqaaluhu
- xilli dugsiyeedka lama daayo mana la soo gaabiyo
- adeegyada caafimaadka dhimirka ayaa loo bixin karaa si wax ku ool ah
- hawlaha kobcinta waxaa loo bixin karaa si joogto ah.

## Tallada 7

Si loo muujiyo waxqabadka wanaagsan iyo in la aqoonsado meelaha koritaanka laga sameeyay, Qaybta Dhallinyarada ee Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta)  waa in ay si joogto ah u qabataa qiimeynta waxqabadka saraakiisha xidhitaanka carruurta ee heerarka kala duwan.

## Tallada 8

Qeybta dhallinta ee Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) waa in ay horumariyaan oo ay hirgeliyaan siyaasad lagu tijaabinayo tayada biyaha ee Patricia H. Clark Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Qoyska iyo Carruurta, CCFJC) ugu yaraan sannadkii.

## Tallada 9

Qeybta dhallinyarta ee Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) waa in ay hubisaa in dhammaan dhallinyaradu ay saacad ka arki karaan qolkooda.

## Tallada 10

Qaybta dhallinta ee Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsiyada Dadka Waaweyn iyo Dhalinyarta) waa in ay kala shaqeeyaan xafiiska dhexdhexaadinta si loo hubiyo in habka cabashada loo gudbinayo ay heli karaan dhalinyarada xabsiga ku jirta iyo in agabka la siiyo dhalinyarada ay u sharaxaan farqiga u dhexeeya cabashooyinka Dhexdhexaadinta iyo cabashooyinka ayaa lagu soo gudbiyay gudaha.